



Sumowga Botulisim (Botulism)

Waa maxay sumowga botulisim?

- Sumowga botulisim waa cudur dhif ah oo muruqyada ku rida qallal ama dhaqaaq-joojin waxana keena sun (walax sun ah) uu sameeyo *Clostridium botulinum* (*C. botulinum*), oo ah bakteeriya si dabiici ah looga helo ciidda. Waxa jira saddex nooc oo waaweyn oo ah sumowga botulisim: *sumowga cunto keento*, *sumowga ilmaha yar*, iyo *sumowga nabarka*. Sunta botulisim waxa loo isticmaali karaa hub biyoolooji ah sababta oo ah hawo ahaan ayaa loo neefsan kara ama waa la liqi karaa.

Sidee ayuu u fidaa suwomga botulisim?

Waa maxay astaamaha lagu yaqaano?

- Waxa uu sumowga botulisim kugu dhici karaa marka aad cuntid cunto ku wasakheysan bakteeriyada cudurka keenta ama marka nabar uu wasakheeyo bakteeriyada cudurka keenta. Qofku cudurka **uma** gudbiyo qof kale. Qadarka soo-gaadhista sunta ayay ku xidhan tahay dhakhsaha ay astaamuhu u soo baxaan ama lagu arko — taasoo ah dhawr saacadood ilaa dhawr maalmood.
- Si kasta ha ahaato sida suntu ku soo gashay jidhka, naatijooiyinka waa isku mid. Marka cudurku sii socdo, astaamaha la isku arko waxa ka mid ah arag ah laba-laba ama arag isku darsan, galka indhaha oo hoos u dhacsan, hadal isku darsan, liqista oo dhib ah, af qallalan, iyo tabar-dari muruq (kaasoo ka bilaabma garbaha oo hoos ugu sii dega jidhka). Ugu dambeyn, waxa laga yaabaa in muruqyada neefsashadu istaagaan taasoo keenta dhimasho haddii aan gargaar neefsasho laga helin mishiin ama qalab.

- **Sumowga botulisim ee cunto keento** waxa uu dhacaa marka qofku cunto cunto ku wasakheysan bakteeriyada sameysa sunta. Tani waxay badanaa ka timaadaa farsamooyin qasaceyn cunto oo aan fiicnayn oo guriga lagu qabtay. Astaamaha ugu horeeya ee la arko waxa ka mid noqon kara lallabo/yalaalugo iyo matag. Sumowga botulisim ee cuntadu keento waxa uu ku dhici karaa dhammaan kooxaha dadka ee ah da' kasta. Meesha ay ka timid cuntada wasakheysan waa in sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoagal ah loo garto si dadka kale looga ilaaliyo inay jirraadaan.
- **Sumowga botulisim ee ilmaha yar** waxa uu ku dhacaa tiro yar oo ah ilmo yaryar sannad kasta oo xiidmhooda ku leh bakteeriyada *C. botulinum*.

- **Botulisimka nabarka** waxa uu dhacaa marka nabar uu wasakheeyo bakteeriyada *C. botulinum*, tusaale ahaan, haddii iyada oo dibadda la joogo uu nabar wasakhoobo marka ay taabato ciid wasakheysan. Bakteeriyadu waxa kaliya ee ay cudur ku ridi kartaa ama wasakheyn kartaa maqaarka dhaawacan.

Talaabooyinka ka-hortagga

- Haddii aad leedahay astaamo, fadlan sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoagal ah la tasho ama u tag bixiye daryeel caafimaad. Haddii aad rumeysan tahay in si kas ama ogaan ah lagu soo gaadhsiiyay botulisim, waa inaad isla markiiba la xidhiidhid saraakiisha fulinta sharciga.
- Ma jiro tallaaf lagaga hortago botulisim. Waxa aad yareyn kartaa halista soo gaadhista marka aad raacdid hab ka shaqeyn iyo karin cunto oo ammaan ah iyo adiga oo nabarada iyo meelaha jeexan ka dhiga nadiif isla markaana si haboon u saara faashad.

Daweynta botulisim

- Daweyn dhakhso ah waa lagama-maarmaan. Xarumaha Xakameynta iyo Ka-hortagga Cuduradu (Centers for Disease Control and Prevention) waxay hayaan kayd ah lidka sunta ee lagu daweeyo botulisim. Dawadan waxa kaliya ee waaxaha caafimaadka ka heli kara bixiyeyaal daryeel caafimaad marka la tuhmo ama la xaqiijiyo botulisim. Dawadu waxay yareysaa darnaanta ama dhibka astaamaha haddii goor hore qofka la siiyo. Badi bukaanku ugu dambeyn way ka ladnaadaan.



PO Box 47890
Olympia, WA 98504-
7890

Bogga Internetka:
www.doh.wa.gov

360-236-4027
(800) 525-0127

DOH Pub 821-022
Somali